



Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta biilasha tamarta?

Ma jirtaa biilal aadan bixin ama dhibaatooyin kaa heesta bixinta biilka Waaxda Korontada Seattle ama biilka (biyaha/ bulaacadaha/qashinka)?

Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno! Waxaan bixinaa ikhtiyaarka dib-u-bixinta biilalka iyo bar-naamijiyada (gargaarka) kaalmada biilka si aan uga caawino macaamiisheena inay si joogta ah u bixiyaan oo ay la socdaan biilasha guriga.

Qorshayaasha Lacag-bixinta

Seattle City Light iyo Qorshayaasha Lacag-bixinta Adeegyada Dadweynaha Seattle

Haddii biilkaagu dhafo waqtigii loogu talagalay Seattle City Light (korontada) iyo Adeegyada Dadweynaha Seattle (biyaha/ bulaacada/qashinka), waxaan siinaa qorshooyinka lacag-bixinta dhammaan macaamiisha deegaanka iyo ganacsiga. Qorshaha lacag-bixinta, waxaad ku bixin kartaa baaqigaaga qaybo yaryar waqti ka dib. Markaad ku bixiso biilashaada tamarta cusub iyo qaybo ka mid ah qorshaha lacag bixinta, waxaad sii wadi doontaa adeegaaga tamarta marka aan dib u bilowno xiriirsiinta lacag-la'aanta.

Barnaamijiyada Caawimada biilka

Haddii aad tahay macaamiisha degganka buxisayna shuruudaha u-qalmitaanka dakhliga, waxaad u qalmi kartaa kaalmada biilka joogtada ah iyo adeegyada kalmada degdegga ah.

Barnaamijka Dhimista Tamarta

Macaamiisha u qalma dakhliga waxay iska diiwaan gelin karaan barnaamijka qiimo dhimista adeega ee magaalada Seattle, kaasoo bixiya qiimo dhimis 60% ah biilasha Seattle City Light mustaqbalka iyo 50% dhimis biilasha mustaqbalka Seattle Public Utilities.

Barnaamijiyada Gargaarka Biilka Degdegga ah

Seattle City Light

Haddii aad ka habsaantay biilka korontaada oo adeegaagu uu halis ugu jiro in lagu xidho, Emergency Bill Assistance Program (Barnaamijka Gargaarka Biilka Degdegga ah ee Seattle City Light) waxaa laga yaabaa inuu ku caawiyo. Macaamiisha u-qalma dakhliga waxay heli karaan ilaa \$710 sanad walba kaalmada degdegga ah si loo dhimo baaqigoodii hore. Qoysaska leh carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18 jir waxay xaq u yeelan karaan ilaa \$1,420 kaalmo sannadkii.

Seattle Public Utilities

Haddii aad ka habsaantay biilkaaga biyaha, bulaacada, ama qashinka oo adeegaagu khatar ugu jiro in la xidho, Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah ee Seattle Public Utilities waxaa laga yaabaa inuu ku caawiyo. Macaamiisha u qalma dakhliga waxa ay heli karaan ilaa \$537 sanadkii gargaar degdeg ah si loo dhimo baaqigoodii hore. Qoysaska leh carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay xaq u yeelan karaan ilaa \$1,074 sannadkii.



Nala soo xiriir

Haddii aad dib uga dhacday biilasha tamarta ama aad ku dhibtoonayso inaad bixiso lacag bil kasta, waxaanu kala shaqayn karnaa inaad dejiso qorshe lacag-bixineed iyo inaad codsato caawimada biilka si aad u ilaaliso adeegyadaaga tamarta.

Khadka naga soo booqo khadka

Nagu soo booqo seattle.gov/UtilityBillHelp si aad u dejiso qorshe lacag-bixineed, iskuna qor gargaar biil, oo aad u bixiso baaqigaga.

Wac Kooxdayada Adeegga Macmiilka

Naga soo wac (206) 684-3000 (Isniin - Jimce; 7:30 subaxnimo - 6:00 galabnimo) si aad lacag u bixiso, kala hadal wakiil wax ku saabsan dejinta qorshe lacag-bixineed, ama aad u codsato barnaamijyada kaalmada biilka. Haddii aad u baahan tahay in lagugu caawiyo luuqad aan Ingiriisi ahayn, kooxdayada daryeelka macmiisha ayaa kugu caawin doona lacag la'aan luqadda aad doorbidayso.

Booqo xarumahayada adeega macaamiisha

Booqo Xarunta Adeegga Macmiilka si aad shakhsi ahaan biilashaada ugu bixiso kaash, jeeg, ama kaarka deynta.

Seattle City Light xaruunta adeega waqooyi

1300 N 97th Street, Seattle, WA 98103 | Isniin - Jimce; 8:30 subaxnimo - 4:30 galabnimo | (206) 615-0600

Seattle City light xaruunta adeega koonfur

3613 4th Avenue S, Seattle, WA 98134 | Isniin - Jimce; 8:30 subaxnimo - 4:30 galabnimo | (206) 386-4200

Xaruunta adeega Ballard

5604 22nd Ave NW, Seattle, WA 98107 | Talaado - Jimce; 9 subaxnimo - 5 galabnimo | (206) 684-4060

Xarunta Adeegga Degmada Dhexe

464 12th Avenue, First Fl, Seattle, WA 98122 | Talaado - Jimce; 9 subaxnimo - 5 galabnimo | (206) 684-4767

Xaruunta adeega magaalada hoose

700 Fifth Avenue, Seattle, WA 98104 | Isniin - Jimce; 8:30 subaxnimo - 4 galabnimo | (206) 684-3000

Xaruunta adeega Lake City

12525 28th Ave NE, 2nd Fl, Seattle, WA 98125 | Talaado - Sabti; 9 subaxnimo - 5 galabnimo | (206) 684-7526

Southeast Service Center

3815 S Othello St, Suite 105, Seattle, WA 98118 | Isniin - Sabti; 9 subaxnimo - 5 galabnimo | (206) 386-1931

Southeast Service Center

2801 SW Thistle St, Seattle, WA 98126 | Isniin - Jimce; 9 subaxnimo - 5 galabnimo | (206) 684-7417

Xarunta Adeegga Jaamacadda

4534 University Way NE, Seattle, WA 98105 | Talaado - Sabti; 9 subaxnimo - 5 galabnimo | (206) 684-7542

SOMALI